



La akhri ilmahaaga

Læs med dit barn





Ereyada cusub. In kor loogu akhriyo ayuu ilmuuhu ku bartaa erezada iyo weedhaha cusub. Carruurtu way jecel yihiin in kor wax loogu akhriyo.

Carruurtu way jecel yihiin dhegaysiga sheekooinka!

Carruurta oo dhan ayaa jecel in kor wax loogu akhriyo – xataa carruurta aad u yaryar ayaa jecel, inay maqlaan hooyada ama aabbaha oo uga sheekaynaya sheeko fiican. Nasiib wanaag. Waayo markay carruurtu aad u yaryar yihiin ee dhegaystaan sheekoxariir iyo sheekooyin, waxay ka helaan luqad fiican oo hodan ah.

Carruurta ay fiican tahay luqaddoodu, waxa u fududaada barashada akhriska iyo qoraalka, markay bilaabaan dugsiga, si fiicanna way u la qabsadaan nidaamka waxbarashada.

Si fudud baad uga caawin kartaa ilmahaagu, inuu yeesho luqad adag, adigoo dhegaysanaya, la hadlaya lana ciyaaraya ilmahaaga. Siyaabo badan ayaad arrintaas u samayn kartaa: Wax u akhri, u hees, u sheekee, wax u sharax oo la ciyaar ilmahaaga! Hadda bilaw – xataa haddii ilmahaagu aad u yar yahay. Waa marka ugu horraysa, ee saldhig fiican loo samayn karo luqadda ilmahaaga.

Sidoo kale ilmahaaga kula hadal oo wax ugu akhri luqaddaada. Marka ilmahaagu ku siican afkiisa hooyo, waxa u fududaanaya barashada luqadaha kale – sida deenishka iyo ingiriisida.

Markaad wax u akhriyaso ilmahaaga – luqaddii ay doonto ha noqotee – waxaa ballaadhanaya khayaalkiisa iyo luqaddiisa. Waxana u fududaanaysa ilmahaaga inuu wax barto, markuu galo dugsiga.

Maxaad ka helaysaa rugkutubeedka?

Waa bilaash in la amaanaysato buugaagta, muusiga, filimada iyo waxyaabaha yaal rugkutubeedka, waxana aannu haynaa waxyabo laga keenay dunida oo dhan oo luqado badan ku dhigan. Sidoo kale waxaa ku jira af soomaali. Waxana aannu kaa caawin karnaa helitaanka, waxaad u baahan tahay.


Rugkutubeedka waxa aannu ku haynaa buugaagta carruurta oo da' walba leh. Waxaanu haynaa buugaagta carruurta ugu yaryar ee farta lagu tilmaamo, buugaagta sawirrada, buugaagta jiibta iyo jaanta, gabayo, buugaag ka hadlaysa maadado gaar ah iyo sheekoxariirro.

Rugkutubeedku wuxu sidoo kale hayaa buugaag loogu talogalay dadka waawayn, sida buugaagta cudurrada carruurta, korinta iyo cuntada carruurta.


Waxa aannu ku faraxsan nahay inaanu kugu aragno rugkutubeedka.

Soo dhawow!


Buugaag, muusig iyo filimo
ka badan 30 luqadood,
ayaad ka dalban kartaa
bogga **bibliotek.dk**




Dhex Iugee kaynta
Debbie Harter




Biyo-Batalaq
Flora McDonnell



Faloobi
Guido van Genechten




Daraagan yar
Riske Lemmens,




**Qudhaadu wax akhri.
Makaad wax akhrido,
ayuu ilmahaaguna
jeelaanayaa wax
akhiska.**




Paddington Bear
goes to market
Michael Bond



Paddington Bear all day
Michael Bond




Xanaanada Emma
Gunilla Wolde




Waxa habboon in loo sharxo erezada
adag. Carruurta way jecel yihin oo
xiiseeyaan, inay wax ka bartaan dunida.


Duukii aadka u gaajooday
Erik Carle




Rugkutubeedka tag.
Sidoo kale carruurta yaryarna
waa la soo dhawaynayaa,
u mana baahna inayn
xasiloodaan!



Guuleed iyo bahalkii
Gunilla Bergström




Libaax & Dabaggaalle
Saynab A J Daahir



Dayaxa ayaa ila lugeeyay
Carolyn Curtis



Teenibkii Weynaa
Henriette Barkow



Wax kasta akhri. Waxed sidoo
kale ku tababarar kartaan luqadda,
idinkoo akhriya waxyaabo ka
baxsan buugaagta. Tusaale ahaan
akhri xayaysiisayda, boodhadhka
jidadka, qoraallada kartuunada
caanaha iyo barnaamijyada tv-ga.



Publikationen er udarbejdet af

Kulturstyrelsen og Statsbiblioteket, BiblioteksCenter for Integration.

Publikationen er finansieret af Bogstart-programmet.

Tekst Nicola Ravden, Lisbet Vestergaard og Hanne Kvist

Redaktion Nicola Ravden og Lisbet Vestergaard

Illustrationer Rasmus Bregnhøi og Helle Vibeke Jensen

Grafisk design Maria Hagerup

Udgivet i 2012 af Kulturstyrelsen, H.C. Andersens Boulevard 2, 1553 København V

Telefon 33 73 33 73 **E-Post** post@kulturstyrelsen.dk



ISBN trykt udgave 978-87-92681-41-6

ISBN elektronisk udgave 978-87-92681-42-3

Tryk C. S Grafisk A/S, Århus **1. opdag** 5.000

Publikationen er tilgængelig på www.kulturstyrelsen.dk

Eftertryk tilladt med kildeangivelse.



**Markasta wax akhri.
Kolkiba in yar uun akhri.
Laakiin markasta wax akhri.**